



## **Golaha Waxbarashadu Waxay Ka Tixgalin siinayaa inay bisha Noofembar 12keeda Ka Dhigaan Maalinta Horumarinta Xirfadlayaasha(Macallimiinta), Maalintaas oo Ardaydu Fasax Tahay**

Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland, shirka maalinta Talaadadda, Oktoobar 26keeda, waxay tixgalin ay kaga fiirsanayaan siin doonaa inay noqoto maalinta horumarinta xirfadlayaasha ee macallimiintu tababarada qaataan maalinta Arbacada, Noofembar 12keeda, maalintaasi oo la baajinayo fasaladii waxbarashada ardayda. Iyada oo sababtu tahay Noofembar 11keedu waa maalin qaran ahaan fasax ah, Maalinta Sooyaalka(Veterans Day), markaa waa inay ardaydu helaan afar maalmood fasax ah oo ay ka mid yihiin labadii maalmood Sabtida/Axadu.

Intii lagu guda jiray xanuunka COVID-19, Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay dib u dhigeen maalintaasi horumarinta xirfadlayaasha ee macallimiintu ay tababarada qaataan iyaga oo diirada saarayey sidii ay u meelmarin lahaayeen tallaabooyinka nabadgelyada iyo caafimaadka.

“Haddaba iyada oo baahidu ay keentay in xilligan xanuunku jira la bilaabo sanad-dugsiyeedkii, macallimiinteenii ma ay helin fursadihii ay ku baran lahaayeen isla markaana ay si wada jir ah u kobci lahaayeen, taasi oo aan aaminsanahay inay si wanaagsan ugu addeegeyso ardaydeena,” sidaasi waxaa yiri Dr. Cheryl Proctor, Madaxa Waxbaarashada.” Macallimiinteenu waxay u baahan yihiin waqti ay ku dhisaan sidii ay si qoto dheer ula qabsan lahaayeen manhajkeena cusub, oo ay ka mid yihiin dhisida hababka ugu muhiimsan casharada ee kor loogu qaadi doono barista iyo barashada fasal kasta oo ka mid ah PPS.”

Marka la fiiriyo xeerarka gobolka, Golaha Waxbarashada PPS waxay oggolaaldeen oo ay ka mid tahay waqti dhan 30 saacadood oo horumarinta xirfadlayaasha sanadkiiba marba sida loogu baahdo waqti waxbarasho ay qaataan. Goluhu waxay tixgalin siin doonaan inay u codeeyaan arrintani maalinta Talaadadda ah. Haddii aad jeceshahay inaad faalo ka bixiso, fadlan waxaad email u soo dirtaa [PublicComment@pps.net](mailto:PublicComment@pps.net) ama waxaad soo wacdaa Xafiiska Golaha Waxbarashada ee telefoonkiisu yahay 503-916-3741. Shirka waxaa si toos looga siin doonaa iyada oo aad ka heli kartaan bogga [PPS YouTube page](#).